Ujeedada xaashida xaqiiqda waa in lagu sharaxo waxa ay ka dhigan tahay marka aad samaynayso dacwad magangalyo iyo qeexida sharciga ah ee qaxootiga.

Refugee Legal Support

SOMALI

# MAXEE KAA WADAA INAAD DALBATIID DEGNASHAHOO?

## Codsiga magangalyada

Markaad magangalyo dalbato:

- Waxaad Codsanaysaa ilaalin
- Waxaad sheegaysaa in aanay amman ahayn dalkaagi, markaa kuma laaban kartid
- Waxaad codsanaysaa in lagu siyo xaqa aad ku joogto dalka aad magangelyo ka codsanayso, sababtoo ah ammaan kuguma aha inaad ku laabato dalkaaga hooyo

AFEEF – Tani waa in la bixiyo macluumaadka guud mana aha talo sharci.

Version 01 - 2024

# YAA WAAYA ‘QAXOOTI’ MARKAA LAA RACOO SHARCIGA?

## Waa kuma qaxooti? Qeexitaanka sharciga ah

Dadku waxay dalalkooda uga baxaan sababo badan dartood. Si kastaba ha ahaatee, kaliya sababaha qaar ayaa ku habboon cidda sharcigu qeexayo qaxooti ahaan.

Sharcigu waa Heshiiskii Qaxoontiga ee 1951, oo mararka qaarkood loo yaqaan Axdiga Geneva

Kani waa sharciga ay dalalku isticmaalaan marka ay isku dayayaan inay go’aan ka gaaraan haddii qof qaxoonti yahay

146 waddan oo adduunka ah ayaa saxiixay sharcigan, markaa taasi waxay la macno tahay qeexida cidda qaxontiga ah waa isku mid dhammaan dalalkan - haddii aad magangalyo ka dalbato Canada, Greece, UK, France, Germany iyo wixii la mid ah

Habka magangalyada - oo ay ku jiraan waraysiyada aad la yeelatay maamulka - waxaa loogu talagalay in lagu fahmo haddii sheekadaadu ay ku habboon tahay qeexida sharciga ah ee qaxootiga.

AFEEF – Tani waa in la bixiyo macluumaadka guud mana aha talo sharci.

Version 01 - 2024

**Sida sharcigu qabo, waxad tahay qaxooti waana in lagu siiyaa sharci, haddi:**

1. **Waxaad ka baqaysaa cadaadis / waxaad leedahay cabsi sal leh oo cadaadis ah**

2. **Cabsida cadaadisku waa isirkaaga, diintaada, dhalashaada, ra'yigaag siyaasadeed iyo koox bulshoo kale hada ka mid tahay**

3. **Maamulka dalkaaga ma ilaalin karaan ama maa rabaan inaay kuu ilaliaan**

4. **Ma nabad geli kartid meel oo dalkaaga ah – ma jirto qayb amaan ah oo add u guuri kartid**

Mid kasta oo ka mid ah qodobadan aya si faahfaahsan hoos loogu sharxi doona.

AFEEF – Tani waa in la bixiyo macluumaadka guud mana aha talo sharci.

Version 01 - 2024

# 1 Waxaan cabsi sal leh cadaadis

## Waxaan cabsi sal leh

Tani waxay ka dhigan tahay runtii oo baqayso oo aad ka baqayso wax dhab ahaantii dhici kara – maaha cabsi aan caqli-gal ahayn ama cabsi aan sabab lahayn

## Cadaadis

Tani waxay ka dhigan tahay in xuquuqdaada aasaasiga ah ee aadanaha la diidi doono ama si weyn loo jebin doono haddii aad ku laabato guriga. Cadaadisku qasab maaha qof isku dayaya inuu ku dilo, xitaa maaha wax jir ahaan daruuri ah, si kastaba ha ahaatee waa inay noqotaa wax halis ah. Tani waxay ku xirnaan doontaa qofka iyo caafimaadkiisa ama u nuglaanshaha - tusaale ahaan, waxa cadaadis u ah ilmaha waxaa laga yaabaa inaysan la mid ahayn qofka weyn eh

Takoorka ama dhibka dalkaaga ka jira inta badan kuma filna. Inkasta oo xaaladaha qaarkood ay noqon karto cadaadis haddii ay aad u daran tahay.

AFEEF – Tani waa in la bixiyo macluumaadka guud mana aha talo sharci.

Version 01 - 2024

# 1 Waxaan cabsi sal leh cadaadis

## Waxa muhiimka ah waa haddii lagugu silcin karo mustaqbalka:

- Dadku waxay inta badan u haystaan in qaxoonti ahaan ay thay inay muujiyaan in mar hore lagu silciyey dalkooda. Tan sharcigu uma baahna.
- Waa suurtogal inaad hesho go'aan wanagsan oo loo aqoonsado qaxooti xitaa haddii aad ka tagtay waddankaaga ka hor intaanay wax xun kugu dhicin.
- Haddii mar hore lagugu silciyey waddankaag hoyoo, waa muhiim inaad tan sheegto, sababtoo ah waxay muujin kartaa in wax la mid ah ay mar kale dhici karaan mustaqbalka.
- Si kastaba ha ahaatee, sababtoo ah mas'uuliyiintuu waxay aaminsan yihiin in mar hore lagugu silciyey macnaheedu maaha inaad heli doonto go'aan wanaagsan oo laguu aqoonsan doono qaxooti.
- Su'aashu waxay tahay haddi lagugu silcin karo mustaqbalka, haddii aad ku noqoto waddankaaga.

**Waa inaad sharaxdaa sababta aad weli khatar ugu jirto, haddi aad ku noqoto waddankaaga hoyo. Haddii add halis ku jirtay ama aad hore u soo martay, taasi kuma filna. Haddii aadan khatar gelin mustaqbalka, ma helo doontid go'aan wanaagsan**

AFEEF – Tani waa in la bixiyo macluumaadka guud mana aha talo sharci.

# 1 Waxaan cabsi sal leh cadaadis

## Yaad ka baqaysaa inuu ku silciyo?

- Waxaa laga yaabaa inaad ka baqdo maamulka dalkaaga hoyo – kuwa talada haya, dawladda, booliiska, ciidanka.
- Waxa kale oo laga yaabaa inaad ka cabsato dadka aan wax shaqo ah ku lahayn maamulka – kala duwan, kooxaha diinta ama siyaasadda, xubnaha qoyska ama bulshadaada.

## Cabsida cadaadisku waxay iman kartaa ka dib markaad ka tagto waddankee

- Waxaa laga yaabaa in marka aad dalkaaga ka baxdo aadan ka baqin cadaadis, si kastaba ha ahaatee tan iyo markii aad ka tagtay xaaladdu way isbedeshay oo khatar bay kuu tahay inaad soo noqoto.
- Sababtuna waxay noqon kartaa in xaaladda dalkaagu is beddeshay.
- Waxa kale oo ay noqon kartaa sababtoo ah waxaad samaysay waxyaabo tan iyo markii aad ka tagtay waddankaaga oo khatar ku ah.

AFEEF – Tani waa in la bixiyo macluumaadka guud mana aha talo sharci.

Version 01 - 2024

# 2 Sababaha aad uga baqayso cadadis (Sababaha heshiiska)

Si loo siiyo sharci qaxootinimo, cabsidaada cadaadisku way inay noqotaa mid (ama ka badan) sababahan dartood. Waxaa loo yaqaan (Sababaha heshiiska) sababtoo ah waxay ku qoran yihiin sharciga, Axdiga Qaxootiga:

1 **Jinsigaaga** – waxaa ku jira qowmiyad, qabil iyo midabka maqaarka

2 **Diintaada** – tan waxaa ka mid a diin la'aan (cibaadaysi); luminta diintaadii hore (riddada); ama diinta beddela (beddelid)

3 **Dhalashadaada** - dhalashada, ama luqadaada/aqoonsigaaga dhaqan xitaa haddii aan si sharci ah loo aqoonsan. Haddii aadan haysan dhalasho tani sidoo kale waa muhiim, tan waxaa loo yaqaan dawlad la'aan

4 **Fikradaada siyaasadeed** - lagama maarmaan ma aha inaad ka mid noqoto koox siyaasadeed ama xisbi rasmi ah, laakiin ka soo horjeeda maamulka

5 **Xubinnimadaada koox bulsho oo gaar ah** - tani waxay la macno tahay inaad tahay ama si ka duwan loola dhaqmi doono waddankaaga sababtoo ah waxaa jira wax adiga kugu saabsan ama aqoonsigaaga oo aadan bedeli karin (tusaale, galmo)

- Si loo siiyo sharci qaxootinimo, sababta aad ugu baqayso cadaadisku waa inay la xiriirtaa mid ka mid ah sababaha kor ku xusan
- Waxaa laga yaabaa inaad halis ugu jirto sababtoo ah mid ka mid ah waxyaabaha kor ku xusan ayaa laguu malaynayaa – tusaalee ahaan dadku waxay u maleynayaan inaad Tahay khaniis, lakiin ma tihid, ama dawladdu waxay u maleyneysaa inaad ka soo horjeedo iyaga, laakiin ma tihid. Tani wali way xisabtamaysaa, waxa muhiimka ah ayaa ah inaad halis ugu jirto mid ka mid ah sababha kor ku xusan
- Mararka qaarkood in ka badan mid ka mid ah sababaha kor ku xusan ayaa lagu dabaqi karaa isku mar.

Haddii aad ka baqayso cadaadis sababo aan ka ahayn 5-ta kor ku xusan, maahan mas'uuliyadda dalka aad magangelyo ka codsanayso inuu ku ilaaliyo.

AFEEF – Tani waa in la bixiyo macluumaadka guud mana aha talo sharci.

# ILAALIN HOOSAD (SHARCIGA INSANIYADA)

**Haddi aad magangalyo ka dalbato Yurub laakiin waxyeelada aad ka baqayso aanay la xidhiidhin 5tan sababood ee kor xusan, waxa weli lagu siin karaa xalaad kale oo loo yaqaan ilaalinta hoose.**

- **Xaaladda qaxoontiga iyo ilaalinta kabista labadaba waxaa loo yaqaan heerka ilaalinta. Haddii la ogolaado, waxaad xaq u leedahay inaad sii joogto dalka aad magangelyo ka dalbatay sababtoo ah waxaa la fahamsan yahay inaysan amaan inaad ku laabato dalkaaga.**
- **Markaad codsanayso magangelyo, waxaad sharxi kartaa sababta aad khatar ugu jirto dalkaaga hooyo laakin ma kala dooran kartid sharciga qaxootiga iyo ilaalinta hoose.**
- **Haddii la siiyo qof ilaalin hoosaad ah, waxaa loo tixgeliyaa si waafaqsan sharci ka duwan (Directive 2011/95/EU), laakiin codsi gaar ah looma baahna, waxaa laggu tixgelin doonaa labada xaaladood si toos ah.**
- **Waddamada intooda badan, faa'iidoyinka helitannka ilaalinta hoose ayaa ka yar kuwa la xiriira sharciga qaxootiga.**
- **Si loo siiyo ilaalin hoosad waa in ay jirtaa khatar dhab oo ah in aad la kulmi doonto waxyeelo halis ah. Tusaaooyinka waxyeelada halista ah waxaa ka mid ah: ciqaab dil/fulin, jirdil, rabshado ka dhaca iskahorimaadyada hubeysan oo aad u xun oo saameeya dadka rayidka ah.**

AFEEF – Tani waa in la bixiyo macluumaadka guud mana aha talo sharci.

# 3 Maamulka dalkaaga kuma ilaalin karo

Si loo siiyo sharci qaxootinimo, waa inaad muujisaa in maamulka dalkaaga uusan ku ilaalin karin.

Haddii aad ka cabsato maamulka dalkaaga hooyo, markaas waxa laga yaabaa inay u muuqato mid iska cad inaysan ku ilaalin karin. Si kastaba ha ahaatee waa inaad weli sharaxdaa tan. Haddii aad ka baqdo waxyeelo qof kale, markaa inta lagu jiro wareysiga magangalyada waxaa laga yaaba in lagu weydiiyo sababta aad uga heli wydey ilaalinta maamulka dalkaaga hoyoo, sida booliska. Haddii aysan suurtagal ahayn ama aysan macquul ahayn inaad wydiisato mas’uuliyiinta dalkaaga hoyoo inay ku ilaaliyaan, markaa waa inaad sharaxdaa sababta.

**Macquulka waa – maxaad ugu tagtaa dalkaaga oo aad halkan u timaaddaa si aad magangalyo u dalbato, hadii aad ka heli lahayd ilaalin gurig, maamulkaaga?**

AFEEF – Tani waa in la bixiyo macluumaadka guud mana aha talo sharci.

# 4 Ma aadi kartid meel kale oo dalkaaga hoyoo ah

Si loo siiyo sharci qaxootinimo, waa inaad mujisaa in meel dalkaaga ka mid ah aysan amaan ku ahayn. Inta lagu jiro wareysiga magangalyada, waxaa laga yaabaa in lagu weydiiyo inaad sharaxdo sababta aad u tagi weydey qayb kale oo dalkaaga ah, si aad uga baxsato cabsida aad ka qabto cadaadis.

Haddii aad ka baqayso in maamulka iyo mas'uuliyiintaas ay ka taliyaan dhammaan waddankaaga hooyo, marka waxay u muuqan karta amid cad inaadan ammaan ku noqon kariin meel kasta. Si kastaba ha ahaatee, waa inaad weli sharaxdaa tan.

Haddi aad u guuri karto meel kale oo waddankaaga ah, laakiin aad sidoo kale la kulmi doonto khataro ama dhibaatoyin halis ah, waa inaad sidoo kale sharaxdaa tan. Haddii ay macquul tahay in lagu weydiiyo inaad nolol cusub ka bilowdo meel ka baxsan aagga gurigaaga waxay ku xirnaan doontaa xaaladahaaga gaarka ah.

Tusaale ahaan, haddii aad tahay nin aqoon sare leh, doob ah, caafimaad qaba oo leh shabakad qoys oo xooggan oo waddankaaga ah – laga yaabee in lagugu soo jeedin karo inaad tagto oo aad nolol cusub ka bilowdo meelo kale oo dalka ah. Haddii aad tahay hoyoo keligeed leh oh leh dhibaatooying caafimaad oo halis ah, waxbarasho ama taageero qoys, waxaa laga yaabaa inaanay macquul ahayn inaad soo jeediso inaad tagto oo aad nolol cusub ka bilowdo qayb aan la garanayn oo waddankaaga ah.

**Macquulka waa – maxaad ugu tagtaa dalkaaga oo aad halkan u timaaddaa si aad magangalyo u dalbato, hadii aad ka heli lahayd ilaalin gurig, maamulkaaga?**

AFEEF – Tani waa in la bixiyo macluumaadka guud mana aha talo sharci.

Version 01 - 2024

# Go’aanada ku saabsan codsigaaga magangelyo

## Go’aan xun

Haddii codsigaaga magangalyada la diido, waa inaad xaq u leedahay inaad racfaan ka qaadato. Waxaa jiri doona waqti kama dambays ah, markaa waa muhiim inaad heso talo sharci sida ugu dhakhsaha badan.

## Go’aan wanaagsan

Haddii lagu siiyo sharci qaxootinimo, taasi waxay la macno tahay inaad go'aan wanaagsan ka gaadhayso codsigaaga magangelyo waana in laguu ogolaado inaad sii joogto dalka aad magangelyo ka codsanayso oo aad ka hesho ogolaanshaha joogitaanka - badiyaa tiro kooban oo sanado ah iyo iyadoo ay suurtogal tahay in dib loo cusboonaysiiyo.

**Waddan kastaa wuu ka duwan yahay markaa waa muhiim in la helo talo sharci oo gaar ah haddii ay suurtagal tahay.**

**Waxaan kuu rajeyneynaa nasiib wacan !**

AFEEF – Tani waa in la bixiyo macluumaadka guud mana aha talo sharci.

Version 01 - 2024